

Sharciga Xaadirinta

Waxaa laga filayaa ardaykasta in uu yimaado dugsiga iyo fasalkaba maalinkasta. Ku imaanshaha waqtigu waa horseedka guusha ardaygu ka gaaro dugsiga iyo aduunkaba. Waxaa qeyb weyn ka qaata waxbarashada imaanshaha iyo ka qeybqaadashada ardayga ee fasalka. Badi barayaasheenu wax ay isticmaalaan waxbarasho ku saleysan Mashruuc “project”. Ardaygu haduu fasalka ka maqnaado saameyn kuma yeesho waxbarashadiisa oo qura wuxuu kaloo saameeyaa kooxdii uu la shaqeynaayay.

Sharciga Iskuulada Shacabka Seattle:

Qalabka iskuulada shacabka ee Seattle waxaa loogu talagalay in ay waxku bartaan ardayda diyaarka u ah in ay wax bartaan. Ardayga oo fasalka usoo xaadirini waayo waxa ay sababtaa himilada waxbarasho ee ardayga oo yaraata. Imaanshaha iyo kasoo qeybgalka ardayga waxa ay qeyb ka tahay dhibcaha ardaygu ku helo koorsadaas.

Sharciga soo Daahista:

Ardayda aan imaanin fasalka marka uu biloowmo ilaa 15 mirir ee ugu horeysa waxaa loo calaameyn doonaa “daahis”. Ardayda waxaa la xaadiriya 15 mirir kadib marka uu fasalku biloowdo. Ardayga xiligaas fasalka ka maqan waxaa loo aqoonsan doonaa “maqane”.

Ka Cudurdaarashada Maqnaanshaha Daruuruga ah:

Waa mas’uuliyada ardayga in uu cudurdaar ka sameysto kuli xiliyadii uu maqnaa ama soo daahay mudo 48 saacadood gudahood ah kadib xiliga maqnaanshaha ama daahista. Xafiiska xaadirintu wuxuu ku siin doonaa “Warqad jaalo” ah oo cadeyn u ah inlagaa cudurdaaray maqnaanshihi ama daahistii.

Shaqada koorsadaas looma aqoonsan doono dhibco dhameystiran haduunan ardaygu ka cudurdaaran dhamaan maqnaanshaha ama daahista. Ardaygu waa inuu ka codsado Barahiisa inuu sameeyo shaqadii dhaaftay dhamaan maalmihii uu maqnaa ama soo daahay.

Hadii aad ku xanuunsaneyso guriga waalidkaa waa inuu telefoon ama E-mail usoo diro xafiiska xaadirinta. Hadii ayan sidaa dhicin ka keen waalidkaa warqad cadeyn ah una gee xafiiska xaadirinta maalinka aad kusii laabato dugsiga. Xafiiska xaadirintu wuu kaaga cudurdaari doonaa maqnaanshahaas.

Ardaydu waa in ay kaga cudurdaartaan maqnaanshahooda xafiiska xaadirinta mudo 48 saacadood gudahooda ah hadii kale looma cudurdaari doono.

Hadii aad rabto in ad baxdo xiliga iskuulka oo aan dhamaanin ka keen waalidkaa warqad codsi ah geeyna xafiiska xaadirinta iyagaa ku siin doona warqad ogolansho in aad dhaqso baxdo.

Hadii aad kasoo daahdo iskuulka oo aadan warqad cudur daar ah wadan si toos ah u aad fasalkaga. Hadii aad wadato gee xafiiska xaadirinta waxaad halkaas ka qaadan doontaa warqad ogolaansho ood fasalkaga ku aado.

Hadii aad wax su’aal ah qabto, fadlan la xiriir:

Ms. Nancy Cromer – Xogheynta Xafiiska Xaadirinta Qolka 109

Telephone: 206 – 252 – 8804 ama emaika: nlcromer@seattleschools.org